SEIU 775 BENEFITS GROUP

progyny

# Sawirka Guud ee Qorshaha Caymiska Progyny

**Taariikhda Dhaqangalka 8/1/2025**

Warqada Soo Koobida Dheefaha iyo Ceymiska (SBC) ayaa kaa caawin doonta inaad doorato qorshe caymis. Dukumeentiga SBC waxay ku tusinaysaa sida adiga iyo qorshaha caymiska aad u wadaagi doontaan kharashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee caymiska leh. Kani waa soo koobitaan kaliya. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiskaaga, fadlan kala xidhiidh U doodida Daryeelka Bukaanka (PCA) ee Progyny ee kuu heellan lambarka (833) 233-0517.

| Su'aalo Muhiim ah | Jawaabaha | Sababta ay Tani Muhiim u Tahay: |
|---|---|---|
| **Waa maxay lacag jarista guud?** | **Shakhsiga $0 / Qoyska $0** | Wax lacag jaris ah ma lahan qorshahaaga caymiska Progyny. |
| **Miyaa la iiga baahan yahay lacagta go'an ee caymiska?** | Maya | Ma jiro wax lacag-bixin ah oo lagaa rabo marka aad adeeganayso qorshaha Progyny ee Uurka iyo Dhalmada Kadib. |
| **Miyaa la iiga baahan yahay lacagaha haraaga lacag jarista kadib?** | Maya | Ma jiraan lacago haraa oo lacag jarista kadib ee qorshahaaga caymiska Progyny ee Uurka iyo Dhalmada Kadib ah. |
| **Ma jiraan adeegyo la dabaro kahor inta aadan buuxinin lacagta lagaa jarayo?** | Maya | Wax kharash ah kama bixin doontid adeegyada Progyny-ga Uurka iyo Dhalmada Kadib. Dhammaan adeegyada la bixiyo ee hoos imaanaya qorshaha waa adeegyo daryeelka kahortaga ah, loogana ma baahna wax kharash wadaag ah. |
| **Ma jiraan lacago kale oo loo jaro adeegyo gaar ah?** | Maya | Ma jiraan lacag ka jarisyo looga baahanyahay qorshaha caymiska HRA Progyny ee Uurka iyo Dhalmada Kadib ah. Dhammaan adeegyada la bixiyo ee hoos imaanaya qorshaha waa adeegyo daryeelka kahortaga ah, loogana ma baahna wax kharash wadaag ah. |
| **Waa maxay xadka lacagta jaabka laga bixiyo ee qorshahan caymiska?** | Shakhsiga $0 / Qoyska $0 | Ma lahan wax xadka lacagta jaabka laga bixiyo ah qorshahaaga caymiska ee Progyny. |
| **Miyuu qofka bixinaya lacag yar haddii uu isticmaalo adeeg bixiye shabakada ka tirsan?** | Ma khuseyso. | Macallimiinta iyo daryeel bixiyeyaasha daryeelka Uurka iyo Dhalmada Kadib ee Progyny ayaa dhammaantood ku jira qorshahan. Ma jiraan wax dheefo ah oo loo heli karo macallimiin aan ka tirsanayn Progyny. |

**Adeegyada Ka Baxsan & Adeegyada Kale ee Ceymiska Leh:**
Waxyaabaha reeban waxaa ku jira qalab lagula socdo ugxan siideynta ee guriga lagu isticmaaalo, adeegyada iyo saadka uu bixiyay adeeg bixiye shabakada ka baxsan, iyo daawaynta ay tijaabada u tixgeliso American Society of Reproductive Medicine. Dhammaan kharashyada la xidhiidha adeegyada haweenka uurka u sida qof kale, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn khidmadaha shaybaadhka, lama dabaro. Haddii dhakhtarkaagu uu codsado adeegyo aan ku qornayn hagahan, fadlan ka hubi PCA-gaaga si aad u xaqiijiso caymiska. Waxaa jira adeegyo qaarkood oo aan hoos iman caymiska Progyny; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in lagu bixiyo qorshahaaga caymiska caafimaad.

**Xuquuqaha Aad u Leedahay Inaad Sii Wadato Caymiska:**
Waxaa jira hay'ado ku caawin kara haddii aad rabto inaad sii wadato caymiskaaga ka dib markuu dhamaado. Meelaha lagala xidhiidhi karo hay'adahan waa: Healthcare.gov: www.HealthCare.gov ama wac 1-800-318-2596 ama goob-suuqeedka caymiska caafimaadka ee federaalka ama SHOP. Noocyo kale oo caymis ah ayaa laga yaabaa inaad hesho, sidoo kale, oo ay ku jiraan iibsashada caymiska shakhsi ahaaneed ee laga helo Goob-Suuqeedka Caymiska Caafimaadka. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Goob-suuqeedka caymiska, booqo www.HealthCare.gov ama wac 1-800-318- 2596.

**Xuquuqahaaga Cabasho iyo Racfaanada:**
Waxaa jira hay'ado ku caawin kara haddii aad cabasho ka qabto qorshahaaga caymiska diidmada sheegashada. Cabashadan waxa loo yaqaan cabasho ama rafcaan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaaga, eeg dukumiintigaaga sharaxaadaha dheefaha ee aad u heli doonto sheegashadaas caafimaadka. Dukumeentiyada qorshahaaga caymiska ayaa sidoo kale ku siinaya macluumaad dhamaystiran oo ku saabsan sida loo gudbiyo sheegasho, racfaan, ama cabasho sabab kasta oo qorshahaaga ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaaga, ogaysiiskan, ama caawin, tag www.dol.gov/ebsa/healthreform and http://www.cms.gov/CCIIO/Resources/Consumer-Assistance-Grants.

**Qoshahan caymiska miyuu bixiyaa Caymis Buuxinaya Affordable Care Act (Sharciga Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo)? Ma Khuseyso.**
Caymiska Buuxinaya Affordable Care Act (Sharciga Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo) si guud waxaa kamid ah qorshayaasha caymiska, caymiska caafimaadka ee laga helo Goob-suuqeedka caymiska ama caymisyada shakhsi ahaaneed, Medicare, Medicaid, CHIP, TRICARE, iyo caymisyo kale oo gaar ah. Haddii aad xaq u leedahay noocyo kamid ah Caymiska Buuxinaya Affordable Care Act (Sharciga Daryeelka Caafimaad ee La Awoodi Karo), waxaa laga yaabaa inaadan xaq u yeelanin canshuur dhimista khidmadaha caymiska bil'laha ah.

**Miyuu caymiskan buuxiyaa Heerarka Qiimaha Ugu Yar? Ma Khuseyso.**
Haddii qorshahaaga caymiska uusan buuxinin Heerarka Qiimaha Ugu Yar, waxaad xaq u yeelan kartaa canshuur dhimista khidmadaha caymiska bil'laha ah si ay kaaga caawiso inaad bixiso qorshe caymis oo laga helo Goob-suuqeedka.